



<http://www.gurmadSomalia.org> | KM 4. Muqdisho | Somalia Email info@gurmadSomalia.org

May 15, 2016

WARMURTIYEED: MA JIRO MUSHARAX UU URURKA GURMAD LEEYAHAY

Sida uu ururka Gurmada dhowr goor horay u caddeeyay, Gurmada waa dhaqdhaqaaq waddaniyadeed, ahdaaftiisana aysan ku jirin inuu noqdo urur siyaasadeed oo doonaya inuu kursi siyaasadadeed u tartamo.

Waxaa nasiibdarro ah in shaqsiyaad isku sheegay inay Gurmada yihiin ay u ololeynayaan qof isku sheegay inuu magaca Ururka Gurmada uu ku yahay musharax u taagan doorashada la qorsheeyay inay Soomaaliya ka dhacdo sanadkan 2016ka.

Gurmada waxay markale hoosta ka xarriiqaysaa in aysan ahayn Xisbi siyaasadeed, balse ay tahay dhaqdhaqaaq waddaniyadeed oo u taagan inuu ka shaqeeyo nabadda iyo madaxbanaanida dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Ugu dambeyn, waxaan dhammaan shacabka Soomaaliyeed halkan uga caddeynaynaa inuusan jirin musharax u taagan xil siyaasadeed oo ay Gurmada leedahay, ciddii arrinkaas sheegatana aysan ahayn mid metesha mabaadi' da guud ee Ururka Gurmada.

Wixii faahfaahin ah, nagala soo xiriir info@gurmadSomalia.org

Wabillaahi Towfiiq

--DHAMMAAD--

Wixii faahfaahin ah, nagala soo xiriir info@gurmadSomalia.org.